QAYBTA CAAFIMAADKA BULSHADA

Su’aalaha Badanaa la Iska Waydiiyo Hagida Dib u furida

Makhaayadaha iyo baararka *(La cusboonaysiiyey 8-05-2020)*

Hoos waxaa ku yaal jawaabaha su'aalaha badanaa la is weydiiyo ee ku saabsan Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) Marxaladda Koowaad Hagida Dib u furida: Jaheynta Gaarka ah ee Maqaayadaha, Baararka, Goobaha qamriga lagu hagaajiyo, Goobaha qamriga iyo cuntada lagu Iibiyo, Meesha waynta lagu sameeyo, Qolalka Dhadhaminta iyo Meelaha isbiriidka lagu sameeyo (jaheynta Wajiga Labaad ee Maqaayadaha iyo Baararka). Jaheynta iyo FAQ-yadaan waxay quseeyaan kaliya aasaasayadaas ka howlgalayo gobolka loo ansixiyay Dib u furida Wajiga Koowaad. OHA waxay bixisaa FAQ-yadaan si ay uga caawiso inay bulshada fahamto jaheynta, inay ka jawaabaan su’aalaha daneeyeyaasha, iyo inay xaqiijiyaan sida jaheynta u quseyn karto dhacdooyinka gaarka ah. FAQ-yadaan ayaa si isdabajoog ah loo cusbooneysiin karaa. FAQ-ga looguma tallogelin inuu qaato booska jaheynta, laakin badelkeeda fasiro, kaabo, oo ku caawiyo buuxinta sharaxaadaha jaheynta.

Hawlwadeenada

S1: Miyaa miisaska la sii diyaarin karaa? Waxay u muuqataa in sii diyaarinta miisasku ay yarayso fursadaha u baylaha ee dheeraadka ee shaqaalaha iyo macaamiisha?

J1: Maya. Miisaska lama sii diyaarin karo oo loogama tagi karo in la fadhiisto macaamiisha la’aantood. Haddii qof shaqaale ah uu rabo inuu sii diyaariyo miis inyar uun kahor inta ayna cidi ku fadhiisan, gaar ahaan haddii tani ay yaraynayso macaamilka ka dhexeeya shaqaalaha iyo macaamiisha, taasi waa dhaqan la aqbali karo.

S2: Xamaamyada, ma u baahannahay qof albaabka ka war haya? Haddii ay haa tahay, qofkani ma noqon karaa mid waqtiga buuxo?

J2: Ilaa xadka suurtogal ah, ganacsiyadu waa inay, laakiin shardi ma aha, u sameeyaan shaqaale la socda macaamiisha galaya meelaha caamka ah sida xamaamyada si ay u hubiyaan in macaamiishu ayna isku ururin. Ganacsiyadu sidoo kale waxay soo dhejin karaan ishaarooyin cadcad oo xasuusinaya macaamiisha inay ilaaliyaan kala fogaanshaha.

S3: Maxay u jirtaa bandowga 10 habeenimo ee loogu tallogalay gobolada Wajiga 1 aad iyo waxa ay midaan ku saleysantahay? ? Miyey miisaska dhameysan karaan cunista 10 habeenimo mise waa inuu qof kastaa baxo 10 habeenimo.?

J3: Dhammaan makhaayaduhu waa inay joojiyaan dhammaan ku cunteynta iyo wax ku cabista goobta ugu dambeyn 10-ka galabnimo. Ganacsiyadani waa inay xirnaadaan wakhtigaas marka laga reebo ujeedooyinka adeegga cuntada safaariga ah. Qofka u dambeeyaa waa inuu ka kaco kursiga si loo hubiyo hoggaansanaan. Makhaayadda ayaa go'aamin doontaa sida loo hoggaansamayo iyadoo ka duulaysa nooca adeegeeda.

S4: Miyey tahay inaanu ku nadiifino jaafeel ama milanka peroxide? Miyey u baahan tahay inay xoog badnaato meelaha qaar? Meeqa jeer ayaa la nadiifinayaa, waxsoosaarkee la adeegsanayaa iyo goorma ayey tahay inaanu nadiifino?

J4: Waa in la nadiifiyo meelaha cuntadu taabatay ee madbakha "gadaasha guriga" iyadoo la raacayo Xeerarka Fayodhawrka Cuntada OAR 333-150-0000. Aagagga "guriga hortiisa", Hay'adda Ilaalinta Deegaanka ee Maraykanka waxay leedahay waxsoosaarada qaar ay hore u sii ansixisey kuwaasi oo ku fiican dilista fayrasyada la midka ah COVID-19. Dhammaan jeermisdilayaasha buuxiya heerkan waxa laga heli karaa halkan.

Jeermisdilayaasha oo dhami ma aha qaar loogu talogalay meelaha cuntadu taabato waana in biyo lagu dhaqo oo la nadiifiyo iyadoo la raacayo tilmaamaha. Raadi qaybta "Jeermisdilaha" ee summadda waxsoosaarka la doortay oo isticmaal wakhtiga taabashada ugu badan iyo heerka barxidda ugu ribban (xaddiga jeermisdilaha lagu qasayo biyaha) qaybtan.

S5: Miyuu mishiinkayga weelku, marka uu ku socdo wareeggiisa caadiga ah, dili karaa fayraska COVID-19?

J5: Haa, mishiinada weelka ee buuxiyaha heerka wakhtigan xagga cuntada iyadoo la isticmaalayo kalooriin ama heerkul sare oo ah 160F rakooyinka weelka wax bay ka taraysaa dilista fayrasyada.

S6: Dadka miyaa looga baahan yahay inay cuntada iyo cabbitaanka la fadhiistaan goobta?

J6: Adeegga marfishka ayaa la oggol yahay ujeedooyinka dalabka iyo/ama qaadashada cuntada. Fadhi ku cunista ayaa si aad ah loo doorbidayaa si loo caawiyo hubinta ku dhaqanka shuruudaha kala fogaanta (6) fuudh.

S7: Miyey tahay Maamulada Caafimaadka Dadwaynaha Deegaanku (LPHA) inay ansixiyaan qorshaha dib u furidda makhaayadda kahor hirgalinta? Miyey

tahay makhaayaddu inay soosaarto qorshe qoran? Miyaa shahaado u hoggaansanka COVID-19 la samaynayaa ama loo baahan doonaa si loo diiwaangaliyo in xaruni ku dhaqantay tilmaamaha dib u furidda Badhasaabka?

J7: Maya. Xarumaha waxa looga baahan yahay inay raacaan tilmaamaha OHA laakiin ugama baahna oggolaansho hore LPHAs si ay u soosaaraan qorshe qoran ama uga helaan waraaqo caddaynaya ku dhaqanka.

S8: Makhaayadaha waxa looga baahan yahay inay joojiyaan adeegga goobta cuntada iyo khamriga lagu isticmaalayo 10ka habeenimo, laakiin goorma ayaa loo baahan yahay in dib loo furo?

J8: Makhaayadaha iyo baararka waa in la furaa maalinta xigta iyadoo la raacayo saacadaha shaqo-furida ee caadiga ah. Makhaayaduhu waa inayna isku dayin inay ka gadaal maraan 10 habeenimo oo ah xilliga xiritaanka looga baahanyahay inay xiraan oo ayna dib u furin saqdadhaxe.

S9: Ma shardibaa in musqulaha jeermiska laga dilo isticmaalka macmiil kasta?

J9: Maya. Musqulaha waa in la nadiifiyo oo jeermiska laga dilo inta badan iyo markii daruuri ay noqotaba, laakiin shardi ma ah isticmaalka macmiil kasta.

S10: Miyey xarumuhu sida ciyaarta bowling alleys ee bixiya cunto laakiin bixiya hawl oo ku xiran sida waafaqsan Amarada Fulinta Gofanatooraha inay dib u furan qeybta adeega cuntada?

J10: Haa. Haddii xaruntu furto qaybta adeegga cuntada oo kaliya oo ay raacdo tilmaamaha OHA.

S11: Miyay macaamiisha yihiin iskaa u adeegashada howlgalada, sida quraacda fudud, cuntada noocyada kala duwan, saladka,Soolidda Mongoliyaanka, saldhigyada buuxsashada cabitaanka (doobiyayaasha iyo soodhaha), iyo mishiinada yoogad ay weli mamnuuc yihiin?

J11: Haa. Cuntada waa inay shaqaaluhu qaybiyaan oo hawlgallada isku-adeegga macmiilka wali lama oggola. Mongolian barbecue-ga waa caadi haddii shaqaaluhu uu soo ururiyo waxyaalaha laga samaynayo marka uu macmiilku soo doorto kahor inta aan la karin. Hawlgallada isku-adeegga ee tukaamada bagaashka, sida cuntooyinka kala duwan iyo olive bars, waa la oggol yahay.

S12: Miyey dib u furidda marxaladda 1 kujiraan baararka, qolalka dhadhaminta, meelaha khamriga lagu diyaariyo iyo meelaha lagu cabbo khamriga?

J12: Marxaladda 1 waxay oggoshahay in dhammaan meelaha cunista iyo cabbitaanka ay furmaan. Hase yeeshee, isticmaalka cuntada iyo cabbitaanka ee goobtu waa inay joogsadaan 10 habeenimo.

S13: Shaqaalaha miyay xisaabiyaan dhinaca xadeynta tirada ugu badan ee maqaayadaha iyo baararka?

J13: Haa, shaqaalaha waxaa lagu daray xadeynta tirada usu imaanshaha oo maqaayada iyo baarka. Xadeynta ugu badnaan waa 100 gudaha ama 250 qof banaanka ah ama tirada dadka oo ay ku saleysantahay go'aaminta tirada (cabirka baaxada aaga/daganaanshaha sida lagu qeexay hoos), mid walba oo ka yar. Haddii ganacsiyada shaqeeyaan adeegyada labadaba gudaha iyo banaanka, kartida ugu badan ee guud ma dhaafi karto 250 qof, oo ay ku jiraan shaqaalaha.

S14: Halkee ayeynu ka heli karnaa buufinaha iyo masaxaadaha jeemisdilaha?

J14: Oregon Restaurant & Lodging Association (ORLA) waxay hayaan liis ah gadayaasha waxsoosaarka nadiifinta oo ganacsiyadu heli karaan.

S15: Halkee ayaanu ka heli karnaa tilmaamo qolalka dhadhaminta?

J15: Tilmaamaha Makhaayadaha/baararka/Khamri Diyaarinta/Qolalka Dhadhaminta/Sifaynta waxa dhammaan laga heli karaa hal dokumenti.

S16: Miyey makhaayaduhu dalban karaan inay dib u furmaan?

J16: Maya. Degmooyinka ayey tahay inay u guuraan Marxaladda 1. Marka degmada loo oggolaado inay gasho Marxaladda 1, makhaayadaha looga baahan maayo inay ku xadidaan adeeggooda safaariga/guriga ugu gaynta. (Haddii liisanka OLCC uu dhacay lacagta oo la bixin waayey darteed, taasi waxay rabtaa in dib loo cusboonaysiiyo. Oregon Lottery wuxuu sidoo kale u baahan doonaa inuu eego mishiinadaada VLT kahor inta aadan hawlgalin.)

S17: Afmarisyada marada ah iyo kuwa waraaqda ah. Shirkadda maradu waxay soo ceshataa maryaha la isticmaalo toddobaadkii halmar. Waa maxay doorbidista la soo jeedinayaa?

J17: Afmarisyada nadiifta ah ee marada ah ayaa la isticmaali karaa. Il gaar ah ku eeg kaydinta maryaha la isticmaalo/uskagga ah. Maryaha uskagga ah waa in lagu kaydiyo kiish bac ah ama weel kale oo fur leh.

S18: Miyay jiraan qawaaniin kala duwan ee loogu tallogalay Waaxda Beeraha Oregon (ODA) ee lagu fulliyay barnaamijyada cuntada iyo Maamulka Caafimaadka Oregon (OHA) ee lagu fulliyay barnaamijyada cuntada?

J18: Guud ahaan, faraqa kaliya waa isticmaalka gacmo-gashiyada. Gacmo-gashiyo ayaa loo baahan yahay dhammaan hawlaha taabashada cuntada ee xarumaha ay maamusho ODA. Xarumaha OHA maamusho waa inay raacaan Xaashida Xaqiiqda Baadisooca Cuntada #1 – Yaraynta Ku Taabashada Gacmaha Qaawan.

S19: Miyaad ku talin lahayd in weelka silfarka ah ee makhaayadda la iskugu gayn karaa hal afmaris oo maro ah?

J19: Haa, kaasi waa dhaqan wanaagsan laakiin shardi ma aha ganacsiyada cuntada iyo cabbitaanada.

S20: Ayuu noqonayaa cidda ugu wanaagsan ee lala xiriirayo si looga codsado waadixin dheeraad ah oo kusaabsan talooyinka?

J20: Su'aalaha iyo codsiyada waadixinta tilmaamaha gobolka waa in loo gudbiyaa covid19.reopening@dhsoha.state.or.us.

:S21: Miyaa makhaayadaha isjiidyada sushi iyo cart-style dim sum ay kujiraan "hawlgallada -isku-adeegga" ee lagu mamnuucay sida waafaqsan Wajiga 1?

J21: Isjiidka sushi waxa loo tixgaliyaa inuu kujiro isku-adeegga lamana oggolaanayo ilaa suxuunta ku wareegsan suunka socdaa uu qaadanayo macmiilku.

Haddii macaamiishu ay ka dalbanayaan dim sum cart laakiin aanu isagu isku adeegayn, waa la oggolaanayaa sida ay dhigayaan tilmaamaha OHA. Xaruntu waa inay qaaddo tallaabooyin taxaddar ah si ay uga ilaaliso cuntada kujirta gaariga inay wasakhawdo inta ay dhex socoto makhaayadda.

Q22: Miyay jirayaan jaheyn gaar ah oo loogu tallogalay sariirta & quraacda iyo xarumaha hoyga ee yaryar ee loo furayo dalxiiska guud (gaar ahaan la xiriirta qabashada cuntada)?

A22: Ganacsiyada hoyga bixiya waa inay raacaan tilmaamaha OHA dhammaan hawlgallada adeegga cuntada.

Q23: Miyey bandowga 10 habeenimo ee goobta cuntada iyo sharaabka lagu isticmaalayo khuseeyaan makhaayadaha ama kafeeyada gudaha isbitaalada iyo xarumaha kale ee caafimaadka?

J23: Maya. Xannibaadaha ku isticmaalka goobtu ma khuseeyaan adeegga cuntada ee xarumaha caafimaadka (sida cusbitaalada), xarumaha daryeelka ilmaha, goobaha shaqada, dhismayaasha dawladda, xarumaha jawaabta xaaladda

degdegga ah, barnaamijyada dugsiga, ama barnaamijyada hoyga iyo cuntada ee u adeega dadka nugul.

S24: Miyaa kuraasta macaamiisha ee ka samaysan dunta ama shayga kale ee daloolada leh loo baahan yahay in jeermiska laga dilo markasta oo uu macmiil isticmaalo?

J24: Maya. Ma jiro shardi in jeermiska laga dilo kuraasta buushka ah markasta oo uu macmiil isticmaalo.

S25: Waxaan haystaa liisanka iibinta khamriga. Halkee ayaan ka heli karaa tilmaamaha OLCC ee dib u furidda?

J25: Xaashida xaqiiqda OLCC ee dib u furidda waxa laga heli karaa halkan.

S26: Waxaan jeclaan lahaa inaan balaariyo dhismayaasha ganacsigeyga boosaska gaar ama dadwayne ama aan iibiyo khamriga, anigoo joogtaynaya kala fogaanshaha jir ahaanta. Sidaas ma yeeli karaa?

J26: OLCC waxay leedahay dalab loo qorto si loo kordhisto dhismayaasha. Waxaad ka heli kartaa dalabka iyo tilmaamaha halkan.

S27: Waxaan qabaa su'aalo kale oo kusaabsan COVID-19 oo la xiriira liisankayga khamriga. Halkee ayaan jawaabo ka heli karaa?

J27: OLCC waxay haysaa xaashida su'aalaha badanaa la iswaydiiyo, oo si joogto ah loo cusboonaysiiyo.
Waxaad ka heli kartaa halkan.

S28: Miyay macaamiisha marayaan dhinaca adeega gaari ku sugida looga baahanyahay inay xirtaan waji daboolashada?

J28: Haa, sida looga baahanyahay Hagida Maaskaraha Gobolka oo dhan, Daboolka Wajiga, Waji Daboolashada , haddii macaamiisha aysan u surutogaleyn inay joogteeyaan lix (6) fiit oo ka fogaanshaha jir ahaanta ee u dhaxeyso gaarigooda iyo daaqada adeega gaariga ku sugida markaas waxaa looga baahanyahay inay xirtaan daboolashada wajiga, maaskaro ama daboolka wajiga.

S29: Miyay bandowga 10 habeennimo quseysaa cashada gudaha kaliya ama dhinaca adeega gaari ku sugida?

J29: Bandowga 10 habeennimo waxay quseysaa cashada gudaha iyo banaanka kaliya – ma ahan adeega gaari ku sugida.

S30: Miyey Hoolalka Iskaashiyadu shaqayn karaan Marxaladda 1?

J30: Hoolalka iskaahiyada ee ku hawlgala liisanka makhaayad way oggolaan karaan in cuntada iyo sharaabka goobta lagu isticmaalo degmooyinka kujira Marxaladda 1, haddii ay ku dhaqmaan tilmaamaha makhaayadaha.

Hoolalka iskaashiyada ee lagaga dhaafay liisan-siinta makhaayadaha xeerka ORS 624.038 sababtoo ah waxay cunto siiyaan xubnaha iyo martidooda way oggolaan karaan in cuntada iyo sharaabka lagu isticmaalo goobta degmooyinka loo oggolaaday inay galaan Marxaladda 1 haddii ay ku dhaqmaan tilmaamaha makhaayadaha.

Sidoo kale, haddii hoolalka kulamo lagu qabanayo, waxa waajib ah inay raacaan Amarka Fulinta 20-27 ee xayiraadaha isku-imaatinka iyo tilmaamaha OHA (sida, joogtaynta kala fogaanshaha jireed, iwm.). Isku-imaatinada lama oggola inay ka badnaadaan 25 qof Marxaladda 1. OHA waxay ku talisaa in hoolalka iskaashiyadu ay xisaabta ku darsadaan waxyaalaha soo socda markay go'aaminayaan inay dib u furmaan iyo in kale iyo ilaa xadka ay ku hawlgali karaan:

- Hoolalka iskaashiyada qaar badan waxay leeyihiin xubno ka tirsan dadka nugul (oo ay kujiraan dadka ka waawayn 65 jirka ama kuwa leh cudur jiitama oo halis badan). Xiita haddii dadaalka ugu fiican loo galo ku dhaqanka tilmaamaha OHA, booqashada hoolalka iskaashiyadu waxay leeyihiin khatar. Badhasaabku wuxuu si xooggan ugu talinayaa in dadka nugul ay guriga joogaan Marxaladda 1.
- Iyadoo ay jiraan dadka nugul iyo waajibka ah in la raaco tilmaamaha makhaayadaha (tusaale ahaan, hubinta in xubnuhu ilaaliyaan masaafadda jir ahaan ay isku jirayaan ee lixda (6) fuudh ah, gaar ahaan markasta oo ay fadhiyaan ama taagan yihiin), macne ayay samayn kartaa in hoolalka qaar ay sii xirnaadaan wakhtigan ama inay adeegyo kooban bixiyaan.

Ka fogaanshaha iyo Daganaanshaha

S1: Ma waadixin kartaa goorta fadhiisiga baararka/marfushka la oggol yahay?

J1: Haddii marfushku/ama baararka si toos ah dhabarka ugu hayso gidaar ama daaqad, fadhiisiga waa la oggol yahay ilaa iyo inta kala fogaanshaha lixda (6) fuudh la joogtaynayo dadka dhexdooda. Haddii ay jirto meel furan oo u dhaxaysa marfushka/baararka iyo gidaarka ama daaqadda, fadhiisiga lama oggola.

S2: Sidee ayaad ku go'aamin kartaa "qaadka ugu badan" si aad u buuxiso tilmaamaha dib u furidda Gofanatooraha?

J2: Hagida OHA ee loogu tallogalay maqaayadaha iyo baararka wuxuu sheegayaa in ganacsiyada ay xadeeyaan tirada usu imaanshaha oo ugu badnaan 100 qof gudaha iyo 250 qof banaanka, oo aanan dhaafeynin 250 qof gudaha iyo banaanka; ama tirada dadka, oo ay ku jiraan shaqaalaha, sida ku saleysan go'aaminta tirada

(cabirka baaxada aaga/daganaanshaha sida lagu qeexay hoos), mid walba oo ka yar.

S3: Miyaa tukaanada iyo meelaha la fadhiisto si cunto loogu cuno ee tukaanada bagaashka ay tahay inay raacaan tilmaamaha OHA ee makhaayadaha iyo baararka?

J3: Haa.

S4: Haddii koodhidu ay leedahay kuraas tiirsi sare leh, dadku ma isku jirsan karaan lix (6) fuudh ka yar?

J4: Maya. Macaamiisha aan ka tirsanayn isku koox wada socota waxa waajib ah inay isku jirsadaan lix (6) fuudh.

S5: Haddii makhaayaduhu rakibaan gidaar ah quraarad, caag, ama gidaar kale oo u dhexeeya miiska ama mishiinada lootariga, ma isku jirsan karaan ka yar lix (6) fuudh? Miyey xaruntu ku rakibi kartaa gidaarka quraaradda ah baararka? Tan ma waxa loo arkaa gidaar mise daaqad si ay u oggolaan karaan fadhiisiga baararka iyadoo macmiisha lix fuudh loo dhaxaysiinayo?

J5: Maya. Macaamiisha aan ka tirsanayn isku koox wada socota waxa waajib ah inay isku jirsadaan lix (6) fuudh. Rakibista gidaaro xarunta dhexdeeda si loo kala qoqobo macaamiisha ama shaqaalaha waxay xannibi ama baddali kartaa socodka hawada taasi oo abuuraysa xaalad hawadu taagan tahay.

S6: Miyay shuruudaha kala fogaanta lixda fuud khuseeyaan fadhiyada dibadda?

J6: Haa. Lix (6) fuudh oo kala fogaansho ah waa la joogteeya dadka dhexdooda iyadoon la eegin inay fadhigyaan gudaha ama dibadda.

S7: Miyey dadka ka badan 25 qof la qaabili karaa qolka cuntada xafladaha haddii miiskii 10 qof lagu xadiday?

J7: Maya. tilmaamaha OHA waxay sheegayaan dadku waa inay ku xadidnaadaan 10 ama kayar. Dadka wada socda ee wada fadhiya hal miis ma aha inay kala fogaadaan lix (6) fuud.

S8: Miyay makhaayadi u baahan tahay inay xadido adeegsiga suxuunta, meelaha lagu kaadsho ama suuliyada si loo hubiyo in macaamiishu joogteeyaan shuruudaha kala fogaanshaha lixda fuudh?

J8: Maya. Hase yeeshee, ilaa xadka suurtogal ah, xarumuhu waa inay u sameeyaan shaqaale la socda macaamiisha galaya meelaha caamka ah sida xamaamyada si ay u hubiyaan in macaamiishu ayna isku ururin.

S9: Marka la eego martida fadhida ee loogu adeegayo dibadda makhayaad, ma jiraan wax xadidis masaafada ah oo ka duwan dhismaha marka la eego fadhiga martida?

J9**:** Tilmaamaha OHA kuma jiraan masaafada ugu yar ama ugu badan ee u dhexeeya fadhiga dhismaha iyo fadhiga dibadda. Makhaayaduhu waa inay ka hubiyaan magaalada ama degmadoodu wixii khuseeya shuruudaha xeerka fadhiga dibadaha.

S10: Miyey tahay inay makhaayaddu samayso gidaar badbaado oo macaamiisha galaya ama dhex socda makhaayaddu si ay miiska u aadaan ay u joogteeyaan (6) fuudh ee u dhexeeya iyaga iyo macaamiisha kale dhexdooda inta ay ku soo socdaan miiska?

J10: Waa inay jirto kala fogaansho lix (6) fuudh ah meel kasta oo macmiil uu ku nagaanayo (tus., gudaha albaabka ama sugitaanka musqusha). Haddii ay suurtogal tahay, qolka cuntadu waa inuu rakibo si uu u oggolaado ugu yaraan lixda (6) fuudh ee kala fogaanshaha had iyo jeer. Hase yeeshee, makhaayadaha yaryar ee taasi ayna macquul ahayn (tus., ay keenayso inayna wax soo hadhin), waa wax la aqbali karo in macaamiishu hore ugu dhaafaan iyagoo lix (6) fuudh u jira macaamiisha fadhida marka ay aadayaan ama ka tagayaan miiskooda.

S11: Sharciga lixda (6) fuudh ma miis ilaa miisbaa? Ama ma waxa weeye macmiil fadhiya inta uu u jirsanayo macmiil miis kale fadhiya?

J11: Miisaska waa in la isku jirsiiyaa ugu yaraan lix (6) fuudh si ay u jiri karto ugu yaraan lix (6) fuudh oo u dhaxaysa dadka aan isku kooxda ahayn.

S12: Miyey tahay qofka shaqaalaha ah inuu u jirsado lix (6) fuudh macmiilka marka uu dalabka qaadayo?

J12: Badbaadada shaqaalaha iyo macaamiisha dartood, lixda (6) fuudh oo dhexeeya shaqaalaha iyo macaamiisha waa in la joogteeyo intii suurtogal ah, laakiin tilmaamaha OHA waxay aqoonsan yihiin in ujeedooyinka dalabka iyo qaybinta cuntada ee miiska dartood, lix (6) fuudh aan had iyo jeer la joogtayn karayn.

S13: Miyey qolalka dhadhamintu yeelan karaan muusig dibadda ah?

J13: Muusishanada awooda inay joogteeyaan ugu yaraan lixda (6) fuudh ee ka fogaanshaha macaamiisha–-iyo dhexdooda la oggol yahay.

S14: Haddii miis u jeedo gidaar (ama teed kale), oo haddaba dhabarka macmiilku xagga qolka u soo jeedo, wali miyaanu u baahannahay inaannu lix (6) fuudh u jirsano gadaasha macmiilka?

J14: Haa.

S15: Waa maxay xeerarka dhacdooyinka meelaha cuntada xafladaha ee hudheeladu?

J15: Amarka Fulinta 20-27 wuxuu kaliya oggol yahay kulamada bulsho iyo madadaalo ee gaaraya ilaa 10 qof ilaa iyo inta ugu yaraan lix (6) ay isku jirsanayaan shakhsiyaadka ka soo kala jeeda qoysaska kala duwan.

Shaqaalaha

S1: Maxay shaqaaluhu u adeegsadaan weelka badalka gacmaha qaawan markay qaadayaan cunto?

J1: Ku dhaqista gacmaha saabuun iyo biyo kaliya waxa laga yaabaa inayna ku fillayn kahortagga gudbinta jeermiska ee gacmuhu u gudbinayaan cuntada diyaarsan inta diyaarintu socoto. Xarumaha ODA liisanka siisay looma oggola inay isticmaalaan gacmaha oo qaawan marka cuntada ay qaadayaan sida ay dhigayso qaybta shuruudaha Xeerka Cuntada ODA: 3-301.11 Kahortagga Wasakhaynta gacmuhu keenayaan.

S2: Shaqaalaha makhaayada waxay ka walaacsanyihiin xirashada maaskaraha maalinta oo dhan iyagoo ku jiro jiko kulul oo ku dhisan Kiimikada Karboonka (CO_2). Ma jirtaa wax xog ah eek u saabsan halis ah CO_2 iyo xirashada maaskaraha wajiga?

J2: Daboolka marada ah ee wajiga hawadu way dhex maraysaa markaa waxay u dhawdahay inaanu CO_2 ku ururin. Daboolada wajiga waxa loo xirtaa si loo daboolo afka iyo sanka si looga hortago faafidda dhibcaha ka imanaya qof una gudbaya qof kale meelaha dadku joogaan.

S3: Shaqaalaha makhaayada waxay ka walaacsanyihiin wax ku saabsan ku xirashada maaskarooyinka maalinta oo dhan jiko kuleel ah. Maxay tahay inay shaqaalaha sameeyaan si ay uga hortagaan kulaylka xad dhaafka, daalka kulku keeno ama neefsiga adkaanaya haddii shardi looga dhigo inay xirtaan maaskaraha wajiga?

J3: Shaqaaluhu waa inay xirtaan daboolka wajiga ee ay si fiican uga neefsan karaan oo ay qaataan nasasho inta shaqadu socoto si ay uga nastaan kulaylka madbakha. Ganacsiyada waxa laga rabaa inay siiyaan afsaabyo, difaaca wajiga, ama daboolada wajiga shaqaalaha iyagoo raacaya tilmaamaha OHA.

S4: Dhammaan shaqaalaha ma waxa laga rabaa inay xirtaan daboolashada wajiga ama kaliya shaqaalaha guriga hortiisa ee toos ula kulmaya macaamiisha ayaa laga rabaa? Shaqaalaha ma waxaa laga rabaa inay xirtaan maaskaraha mise waxay xiran karaan marada daboolka wajiga?

J4: Dhammaan shaqaalaha adeegga cuntada, iyadoon la eegin shaqada, waxa looga baahan yahay inay xirtaan waji dabool marka laga reebo markay wax cunayaan ama cabbayaan ama marka ayna meel dadwayne joogin halkaasoo lix (6) ama ka badan la joogtayn karo sida ay dhigayaan tilmaamaha OHA Shaqaaluhu waxay xiran karaan afsaab, waji dabool ama waji difaac sida ay dhigayaan tilmaamaha OHA.

S5: Muxuu u jiraa sharciga cusub ee dhammaan shaqaalaha makhaayadaha ka raba inay xirtaan daboolka wajiga, iyadoo baryihii hore cidna aan laga doonayn inay sidaas yeelaan?

J5: Macaamiisha wax ku cunaya goobta waxa jirta halis dheeraad ah inay u baylahaan, guud ahaan. Daraasado dhawaan la sameeyey waxay muujiyeen in xirashada daboolka wajigu yareeyo faafidda COVID-19.

Hawlgalada Mashiinada Khamaarka ee Elektirooniga ah (VLT)

S1: Tilmaamaha VLTs ee makhaayadaha wuxuu sheegayaa "isku jirsii VLT-yada ugu yaraan lix (6) fuudh." Waxaan rumaysanahay in la ii sheegay in ganacsiyadu aan looga fadhiyin inay taabtaan/dhaqaajiyaan mishiinada iyagu. Siyaas miyaa? Miyay tilmaamuhu yihiin runtii in OLCC ay eegi doonto mishiinadaada oo ay kaala shaqayn doonto meelayn habboon ka hor inta aadan hawlgalin?

J1: VLT-yada waxa eega Oregon State Lottery (OSL). Haddii makhaayad/baararka ay u baahato in la dhaqaajiyo, waa inay la xiriiraan OSL kuwaasi kaalmo uga dalbi doona xafiiska shaqada ee ugu dhaw. Kahor OSL inta ayna mishiinada dib u hawlgalin, waa inay ku qancaan in shuruudaha kala fogaanshaha lixda (6) fuud ah la buuxiyey.

S2: Miyey wakhtiga joojinta shaqada ee 10 habeenimo khuseeyaan Boosteejooyinka Bakhtiyaanasiibka Fiidiyaha (VLTs)?

J2: Haa, bandowga 10ka habeennimo wuu quseeyaa Boosteejooyinka Bakhtiyaanasiibka Fiidiyaha (VLTs).

Helitaanka dukumiintiga: Wixii shakhsiyaadka naafada ah ama shakhsiyaadka ku hadla luuqad aan ka aheyn Ingiriis, OHA waxay ku bixin kartaa warbixinta qaabab kale sida fasiraadaha, daabacada balaaran, ama farta indhoolayaasha. Kala xiriir Mavel Morales lambarka 1-844-882-7889, 711 TTY ama OHA.ADAModifications@dhsoha.state.or.us.